

**Magaca musharaxa:** Ry Armstrong (iyaga/iyaga)

**Magaca Ololaha:** Armstrong ka Dhammaan

**Websiteka ololaha:** armstrongforall.com

**Booska Magaalada:** Duqa Magaalada Seattle

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** +1 206-657-6287

Bartamaha Seattle, waxaan u taaganahay qabanqaabiyaha shaqaalaha, anigoo raacaya wadadii qoyskayga. Marna kamaan cabsan tartan. Waxaan sanado ku qaatay u halgamida xuquuqda shaqaalaha, guriyo la awoodi karo, iyo fanka. Anigoo ah La-Agaasimaha Fulinta ee Sustainable Seattle, waxaan u shaqeeyaa magaalo nadiif ah, cadaalad ah oo ilaalinaysa kuwa noogu nugul. Muddo shan sano ah, waxaan la abaabulay ururrada shaqaalaha oo waxaan hadda ka shaqeeyaa Golaha Qaranka ee AFL-CIO ee AEA, oo matalaya 50,000 oo shaqaale hal abuur leh si ay ugu halgamaan mushahar caddaalad ah, badbaado, iyo dheefo. Wakhtigii aan ka tirsana Seattle LGBTQ Commission iyo sannadaha u doodista ayaa i baray sida dawladda magaaladu u shaqeyso. Waxaan rumaysanahay in gaadiidka dadwaynuhu uu bixiyo qiimo dhimis ama Safar bilaash ah si loo caawiyo qoysaska shaqeeyaa inay u socdaalaan guud ahaan magaaladeena oo ay yareeyaan qiiqa si looga hor tago isbedelka cimilada. Waxaan qorsheynayaa inaan ku daro 1,000 sariirood oo hoy ah Gabaadka (Shelter) 100 ka maalmood ee ugu horreeya. Beddelidda shuruucda isticmaalka dhulka waxay naga caawin doontaa inaan dhisno xarumaha daryeelka carruurta oo aan Seattle ka dhigno mid xooggan. Dib uga noqon maayo 2025-magaaladayadu waxay diyaar u tahay inay u dagaalanto mustaqbal wanaagsan. Waxaan kaa codsanayaa taageeradaada. Aan dadka siino mudnaanta hore. Wadajir!

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca musharaxa:** Bruce Harrell

**Magaca Ololaha:** Bruce ee Seattle

**Bog-khadka ololaha:** BruceforSeattle.com

**Jagada:** Duqa Magaalada Seattle

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-569-8486

Sharaf bay ii tahay in aan ku adeego ahaanshaha Duqa magaaladaada! La shaqaynta shaqaalaheenna magaalada, waxaa naga go'an Seattle oo ammaan ah, la awoodi karo, oo soo dhawaynaysa dhammaan.

Waxaan ku faanayaa guulahayga ilaa hadda:

● Diiwaangelin maalgelinta guryaha la awoodi karo, oo ay ku jiraan guryaha taageerada kuwa aadka u nugul, iyo kumanaan guri oo loogu talagalay dadka shaqeeya iyo qoysaska.

● Horumarinta amniga dadweynaha oo ay ku jiraan shaqaalaha booliiska Seattle; abuurista Kooxda DARYEELKA oo si naxariis leh, gurmadka aan hubaysnayn oo la siiyo kuwa u baahan; iyo maalgelinta badbaadada dhalinyarada iyo ka hortagga rabshadaha qoryaha.

● Waxkaqabad cimilo oo degdeg ah si dhismayaasha looga dhigo kuwo nadiif ah, loo hagaajiyo marin-u-helidda iyo waddooyinka nabdoon, balaarinta goobaha korontada EV, iyo beeridda kumanaan geedo cusub ah.

● Diirada saaraa adeegyada aasaasiga ah- hagaajinta waddooyinka, ogolaanshaha la hagaajiyay, iyo taageerada ganacsiyadayada yaryar ee firfircoon.

Boonooyinkaaga iyo codadkaaga ay weheliso, horay ayaan u socon doonnaa!

●Kordhinta guryaha la awoodi karo – laga bilaabo guryo qoysaska ku habboon oo ku dhow dugsiyada ilaa guryo dabaqyo ah iyo koondhooyinka ee si fudud looga heli karo gaadiidka dadweynaha; waa inaan kordhinaa fursadaha helitaanka, yareynaa kharashaadka, oo aan abuurnaa fursado hanti (dhaqaale) jiilba jiil u gudbiyo.

● Horumarka amniga- qorista SPD, Ballaarinta Kooxda CARE, dhimista rabshadaha, iyo wax ka qabashada fentanyl iyo isticmaalka muqaadaraadka.

● Dar-dargelinta mustaqbalka Seattle– Tareenka fudud ee West Seattle ilaa Ballard, dhamaystirka Waterfront iyo dib u qaabeynta Seattle Center,soo celinta bartamaha magaalada si ay u gaarto sharaftii dhabta ahayd ee Emerald City.

Waxaan codsanayaa taageeradaada oo sii socota.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca Musharaxa:**Katie Wilson

**Magaca Ololaha:** Wilson oo ordaya Seattle

**Bog-khadka Ololaha:**wilsonforseattle.com

**Booska Magaalada:** Duqa Magaalada Seattle

**Taleefanka Ololaha:**607- 301 - 1836

Magacaygu waa Katie Wilson waxaana u tartamayaa inaan noqdo duqa cusub ee Seattle.

Waxaan 14-kii sano ee ugu dambeysay aan ku bixiyay xirfadayda dhisidda iyo hoggaaminta iskaashi iyo guulo waaweyn oo keenay in qoysaska shaqeeya: mushahaar ugu yar oo ka sarreeya, ilaalin xooggan oo loogu talagalay kiraystayaasha, guryo la awoodi karo oo badan, gaadiid dadweyne oo wanaagsan, iyo canshuuro lagu soo rogay kuwa awooda dhaqaale leh inay bixiyaan saamigooda halkii laga qaadi lahaa annaga oo horeyba u bixinaynay wax badan. Waxaan ogahay sida dadka loo mideeyo iyagoo kala duwan si loo gaaro guulo waaweyn.

Duqa hadda jira wuxuu ahaa siyaasi Golaha Magaalada tan iyo 2008. Intii lagu jiray waqtigaas, qiimaha kireynta ama iibsiga guri gudaha Seattle wuu laba jibbaarmay, waxaana sii kordhay tirada dadka aan hoy laheyn ee ku nool waddooyinkeena.

Arrintu sidaan kuma qasbana inay ahaato.  Waxaan u dhisi karnaa guryo dhammaanteen. Waan yeelan karnaa xaafado firfircoon oo lagu noolaan karo. Waan yeelan karnaa ganacsiyo yaryar oo kobcaya. Waan yeelan karnaa wadooyin dadka u muuqda kuwo ammaan ah sababtoo ah waxay yihiin kuwa ammaan ah. Waan ilaalin karnaa bulshooyinka soo galootiga ah oo waxaanu fursad u abuuri karnaa dhammaanteen. Arintan waxaan ku qaban karnaa si wadajir ah.  Balse Seattle waxay u baahan tahay hoggaamin cusub.

Tani waa magaaladeenna.  Waxaan rabaa inaan awooddiina iyo codkiina keeno Xarunta Magaalada.  Igala soo qaybgal, oo aanu hawsha qabano.

*Musharaxan ayaa ka qeyb galaya Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca Musharaxa:** Ann Davison

**Magaca Ololaha:** Deriska ee Ann

**Mareega (Boga) Ololaha:** https://neighborsforann.com/

**Jagada Magaalada:** Musharaxa Qareenka Magaalada

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** (206) 257 - 2206

U adeegida sidii Qareenka Magaalada Seattle tan iyo 2022 waxay ahayd sharaf aad u weyn, waxayna igu dhiirrigelisay inaan sii wado diirad-saarka hagaajinta amniga dadweynaha ee Seattle.Haddii ay tahay dadaalkayga lagu soo celinayo isla xisaabtanka waqtiga-dhabta ah ee nidaamka caddaaladda dambiyada fudud, la shaqaynta sharci dejinta ama golaha magaalada si aan u hormarinno shuruucda ama shaqada dawladeena, waxaan diirada saaray sidii aan nidaamkeenu ugu shaqayn lahayn si hufan si loo gaarsiiyo dadweynaha. Waxaan keenay sharci lagu ilaalinayo goobaha guud ee magaaladeena iyadoo aan laga fogaan goobaha daroogada iyo goobaha dhilleysiga, si loo carqaladeeyo shabakadaha dambiyada ee beegsanaya dadka nugul.taasoo carqaladaynaysa ganacsiyada dambiyada ugaadhsada dadka nugul. Waxaan joogaa meesha ugu saraysa ee xafiisyada xeerilaalinta oo leh daah-furnaan xog oo aan horay loo arag iyo helitaanka bulshada si dadweynaha loogu sheego shaqadayda iyo sababaha go'aamadayda. Anigoo ka duulaya ujeeddo badbaado dadweyne, waxaan dacweeyay kuwa baabuurta sameeya oo gawaadhidooda ugu raqiisan suuqyada soo galiyay iyagoo khatar aad u wayn ugu jira in la xado. Waxaan Seattle soo geliyay 160M si aan u nadiifiyo deegaanka Duwamish, magdhawgii hal magaalo ee ugu weyn dalka oo ka yimid shirkadda weyn ee kiimikada. Waxaan halkaan u joogaa inaan ilaaliyo Seattle iyo sharcigeeda mana daali doono ama joojin maayo sinaba haddii dib la ii doorto.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca musharaxa:** Erika Evans

**Magaca Ololaha:** Dooro Erika Evans

**Bog-khadka Ololaha:** www.ElectErikaEvans.com

**Booska Magaalada ee uu u tartamayo:** Xeer

Ilaaliyaha Magaalada

**Iimeelka ololaha:** info@ElectErikaEvans.com

Waxaan u tartamayaa inaan noqdo Qareenka Magaalada Seattle ee soo socda sababtoo ah waxaan jeclahay magaaladan-oo waxaan ogahay inaan sidaan ka sii wanaajin karno. Waxa aan ku dhashay guri ku qotoma xuquuqda madaniga ah iyo dhaqaalaha, waxaanan ku noolaa halgankii soo food saartay in badan oo ka mid ah bulshooyinkeenna . Waxaan xirfadayda ku qaatay difaacidda xuquuqdeena iyo samaynta sharciyo dadka ka dhiga kuwo nabadgala.

Waxaan ahay musharaxa keliya ee ka soo shaqeeyay labada qaybood ee dambiyada iyo madaniga ah ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada Seattle. Waan aqaan sida xafiiskaan u shaqeeyo-iyo sida loo keeno isbeddel dhab ah. Ka garsoore ahaan si meel-ku-gaar ah ee maxkamadda magaalada, waxaan arkay sida la xisaabtanku u egyahay. Xeer-ilaaliye federaal ahaan, waxaan tilaabo ka qaaday loo-shaqeeyayaasha xaday mushaarrada, maxkamadeeyay dembiyada nacaybka, la xisaabtamay tahriibiyeyaasha qoryaha iyo fentanyl, oo u istaagay dhibanayaasha rabshadaha.

Badbaadada dhabta ah waxay ka macno weyntahay xabsi-dhigis. Waxay ka dhigan tahay isla xisaabtan naxariis leh, ilaalinta muruqmaalka iyo bey'adda, xorriyadda taranka, iyo xalalka dhabta ah ee u dhigma xabsi-gelinta.  Taasi waa sababta aan ugu guuleysan doono Maxkamad Bulsheed cusub oo diiradda saareysa baxnaaninta - ma ahan albaabbada wareega.

Waqti xuquuqdeenna ay weerar ku yihiin maamulka Trump, waxaan u baahannahay Xeer-ilaaliye Magaalo oo leh khibrad, laf dhabar, iyo aqoon uu kula dagaalamo—oo hogaamiya maalinta koobaad. Diyaar baan ahay.

*Musharaxaan wuxuu ka qeyb-galaya Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca musharraxa:** Rory O'Sullivan

**Magaca Ololaha:** Saaxiibada Rory O'Sullivan

**Websiteka Ololaha:** www.electrory.com

**Booska Magaalada ee uu u tartamayo:** Xeer Ilaaliyaha Magaalada

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-356-9852

Magaalada Seattle waxay u qalantaa Qareen mudnaanta siinaya ka dhigista magaaladeena mid amaan ah. Dhamaanteen waxaan nahay kuwo kaso- horjeeda dambiyada, laakiin kasoo hor-jeed kaliya inaguma filna. Waxaan wali sugeynaa xalalka.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada waxa uu xidhay maxkamada Bulshada, waxa uu doortay dagaal uu la galay garsoorayaal la soo doortay, waxa uu ogolaaday in dadka iyago cabsan Baabuurta kaxeeya dacwad oogistoodu noqdaan buufin ilaa 85 maalmood, waxba ma samayn marka la eego amarada fulinta ee aan sharciga waafaqsanayn, waxa aanay ku guuldaraysteen in ay abuuraan magaalo amaan iyo naxariis badan oo ay balan qaadeen in ay abuurayaan.

Waxa aan xirfadayda ku qaatay u dagaalanka shaqaalaha, ano hubinaya in si cadaalad ah loo galo nidaamkayaga sharciga, waxaan laha wada shaqayn firfircoon. Waxaan diyaar u ahay inaan hogaamiyo xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada kaasoo riixaya xal u helida dhibaatooyinka soo wajaha Seattle.

Waxaan dib u soo celin doonaa maxkamadda bulshada iyada oo la wanaajiyey raadraaca si aan u bixiyo fursad aan kaga baxsado wareegga dembiga, dedejiyo dacwad-ku qaadidda rabshadaha qoyska iyo wadista sakhraansan si aan u joojino sugitaanka dib -u-soo noqoshada dembiyada, xoojinta heerarka shaqada ee xooggan si looga ilaaliyo shaqaalaha in loola dhaqmo si xun shaqada, iyo abuurista xafiiska qareenka magaalada oo karti leh - diiradana saaraya maamul wanaag.

Taageerada: Guddoomiyaha Caymiska Patty Kuderer, Senetarka Gobolka Rebecca Saldaña, Wakiilada Gobolka Chipalo Street iyo Sharon Tomiko Santos, Xubnihii hore ee Golaha Magaalada Tammy Morales iyo Mike O'Brien, Seattle Dispatchers' Guild, iyo in ka badan.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca musharaxa:** Adonis Ducksworth

**Magaca Ololaha:** Adonis for Seattle

**Mareegta Ololaha:** AdonisForSeattle.com

**Booska Magaalada:** Booska 2aad ee Golaha Magaalada

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-495-5597

Waxaa isoo korisay hooyo keligeed ah oo ku jirta saddex dabaq oo ku yaal Beacon Hill. Xusuus wacan ayaan u leeyahay la ciyaarista asxaabta xaafadda oo dhan. Guryaha la awoodi karo ee u dhow dugsiyada iyo adeegyada ayaa muhiim u ahaa xasilloonidayada.

Maanta, dadku waxay ka walwalaan rabshadaha qoryaha, inaysan awoodin inay iska bixiyaan kirada guryaha, qiimo aysan awoodin dartiis ku waayeen guryahoodii, iyo fursado la'aanta carruurta.

10kii sano ee la soo dhaafay, waxaan u shaqaynayey sidii wacyigeliye, ka qaybqaadasho, iyo xirfadle siyaasadeed ee Magaalada Seattle. Magaalada oo dhan waxaa aan khibrad u leeyahay sida dadka la iskugu keeno si wax loo qabto.

Waxaan u ordayaa sababta ah in aan ogahay in aan wax wanaagsan u qaban karno bulshadeena.

Codkaaga oo aad i siiso, waxaan ku heli doonaa natiijada aan u qalano:

- Ikhtiyaarada guryeynta ka wanaagsan dadka raba inay ku noolaadaan Southend; fursado badan oo loogu talagalay dadka raba inay ku nagaadaan guryahooda iyo xaafadooda.
- Saraakiisha booliiska oo lala xisaabtami karo, balaadhinta jawaabayaasha Kooxda CARE, iyo maalgelinta faragelinta waxay yaraynaysaa rabshadaha hubka iyo ilaalinta carruurta iyo ganacsiyada yaryar.
- Dhisida guusha Canshuurta Gaadiidka, waxaan ka shaqayn doonaa in aan Xawaaraha baabuurta hoos u dhigo Rainier iyo MLK, ka dhigo gaadiidka mid badbaado leh oo la isku halayn karo, oo ay helaan dhamaan isticmaalayaashu gaadiid badbaado leh, la sii saadaalin karo, iyo doorashooyin hufan.

*Musharraxaan wuxuu ka qeyb-qaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca musharraxa:** Eddie Lin

**Magaca Ololaha:** Eddie ee Seattle

**Website-ka ololaha:** https://www.linforseattle.com/

**Booska Magaalada:** Booska 2aad ee Golaha Magaalada

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-734-7412

Isago ahaa Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Magaalada ee Xafiiska Guriyeynta, Eddie waxa uu ka shaqaynayay sanado badan si uu u caawiyo maalgalinta kumanaan guri oo la awoodi karo. Waxa uu aaminsan yahay in dhimista kirada cirka isku shareertay ay tahay mudnaanta koowaad. Eddie waxa uu si hagar la'aan ah uga shaqayn doonaa sidii uu wax uga qaban lahaa ka saarista aagagga ee so jireenka ah, dib-u-dhiska, iyo maalgelin la'aanta nidaamsan ee culayska saartay magaaladeena muddo tobanaan sano ah, gaar ahaan Koonfurta Dhamaadka.

Eddie waa wiilka soogalooti Taiwanese ah wuxuuna la kulmay takoor intii uu ku soo korayey North Carolina. Waxa uu ku tiirsanaa deeqo waxbarasho, kaalmo lacageed, wuxuna ka shaqaynayay shaqooyin badan si uu u bixiyo kharashka Jaamacadda. Wuxuu ahaa rinjiile guri, nadiifiye kaniisad deegaanka ah, iyo dire fariin baaskiil. Sida dadka ku cusubi cadeeyeen: "Dhibaatada awoodis laanta guryaha ee Seattle kuma cusba Eddie, wuuna la noolaa."

Eddie wuu ordayaa sababtoo ah wuxu ka niyad jabay deg-deg la'aanta wax ka qabashada caqabadaha ugu adag Seattle. Haddi ay tahay badbaadada dadwaynaha, Guryaha la awoodi karo, guri la'aanta, ama dugsiyada dawlada ee daalaa dhacaya, waxa uu diyaar u yahay in uu is xil qaamo oo uu sameeyo horumar la taaban karo.

Eddie wuxuu aaminsan yahay in Seattle ay tahay meel qof walba uu leeyahay- waana sababta uu u taageerayo canshuuraha shirkadaha hodanka ah iyo tujaarta si loo maalgeliyo adeegyada muhiimka ah ee aan ku tiirsannahay.

*Musharraxaan wuxuu ka qeybqaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*



**Magaca musharaxa:** Dionne Foster

Magaca Ololaha: Dionne ee Seattle

**Boga-khadka ololaha:** dionnefoster.com

Jagada Magaalada: Jagada #9 ee Golaha Magaalada Seattle

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-651-5493

Waxaynu mudannahay waddooyin nabdoon, guryo la awoodi karo, iyo hogaamiyayaasha Seattle oo ilaaliya xuquuqdeena oo ixtiraamaya codkeena.

Dionne Foster waa khabiir siyaasadeed, hogaamiye bulsho, shaqaale bulsho oo tababaran, iyo hooyo ku qaadatay in ka badan toban sano ka dhigista bulshooyinkeena kuwa badbaado leh, sii waaraya, iyo sinnaan. Waxay u sharaxan tahay Golaha Magaalada si ay u dhisto diiwaankan hogaaminta wanaagsan - dib u jahayna Golaha si ay wax uga qabataan arrimaha mudnaanta leh ee la wadaago iyo baahiyaha degdega ah, ma aha ajendhayaasha gaarka ah.

Intay ahayd Agaasimaha Fulinta ee WA Progress Alliance, waxay ka caawisay gudbinta iyo ilaalinta maalgashiga taariikhiga ah ee daryeelka ilmaha, waxbarashada hore, iyo dhismaha dugsiga iyada oo u maraysa hoggaankeeda ku aaddan canshuurta shirgadaha waaweyn ee gobolka oo dhan - iyadoo hubinaysa in dadka hodanka ah ay bixiyaan saami cadaalad ah iyo wax ka qabashada kharashaadka iyo maalgelinta baahiyaha.

Intay ahayd Lataliyaha Siyaasadda Sare ee Magaalada Seattle, Dionne waxay maareysay ka qaybgalka daneeyayaasha si loo horumariyo badbaadada dadwaynaha, loogu abuuro fursado dhalinyarada, loona gaadho yoolalka cimilada. Intay joogtay Seattle Foundation, waxay maalgelisay ururrada abuuraya xeelado guriyeynta cusub iyo horumarinta dhaqaalaha.

Taageeradaada, Dionne waxay gacan ka geysan doontaa isu keenida Seattle si ay wax uga qabato caqabadaha qaranka oo ay u wado horumarka maxalliga ah si ay u caawiso qof walba inuu dareemo nagadgeylo, soo dhawayn iyo taageero magaaladeena. Dionne waa musharaxa kaliya ee tartankan ay ansixiyeen Golaha Shaqaalaha MLK.

*Musharaxan ayaa ka qeyb galaya Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca musharaxa:** Sara Nelson

Magaca Ololaha: Sara Nelson ee Golaha Magaalada

Boga ama mareegta ololaha: SaraForCityCouncil.com

**Jagada:** Jagada 9 Golaha Magaalada Seattle Guud

**Lambarka Telefoonka Ololaha:** 206-821-6140

Waxaan ahay Sara Nelson, Xubin golaha magalaada oo dhan.

Afar sano ka hor, Seattle waa ay xayirneed (horomar majirin) - wajaheysay dambiyo sii kordhaya, xeryo ku yaal jardiinooyinkeena, iyo Golle u muuqday inuu aad u xiisaynayo inuu sameeyo hadallo halkii uu hormar sameyn lahaa. Waxaan u orday inaan taas beddelo.

Maanta, ugu dambeyntii waxaan bedeleynaa jihada. Seattle waxay shaqaaleysiinaysaa ciidanka booliiska ka badan intii aanu luminay markii ugu horeysay tan iyo 2019. Waxaan si toos ah wax uga qabanaynaa faafida fentanyl-ka annagoo ballaarinayna iskaashiga aan la leenahay Evergreen Treatment Services (Adeegyada Daaweynta Evergreen) ee keena daawaynta wareega iyo taageerada tooska ah dadka la halgamaya balwadda isticmaalka opioid. Oo markii meheradaha xaafadu ay wajaheen jabin, waxaanu samaynay Sanduuqa Dayactirka Dukaamada si aanu uga caawino inay kasoo kabtaan kharashkooda.

Qof kastaa wuxuu u qalmaa helitaan la mid ah soo-kabashada aan helay. Taasi waa sababta aan diiradda u saaray bixinta daawaynta bilaashka ah, ee baahida loo qabo, anigoo hagaajinaya wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah ee magaaladayada oo dhan.

Waxaan aaminsanahay in la keeno natiijooyin, ma aha dood aan dhammaad lahayn. Hadday taasi caawinayso ganacsiyada yaryar inay horumaraan ama ay taageeraan machadyada bulshada ku salaysan ee ka dhigaya magaaladeena mid aad u firfircoon.

Caqabadaha ina horyaala waa kuwo adag laakiin si wadajir ah ayaan hormar dhab ah u samayn karnaa. Sharaf bay ii noqon doontaa inaan kasbado taageeradaada si aan u sii wado shaqadan.

*Musharaxani kama qayb galayo Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada.*